

WARARKA MATXAFKA

CINWAAN

Madxafku wuxuu ku yaalaa 10 W. 7th St. Bartamaha Magaalada St. Paul.

SAACADO


Madxafku wuxuu furan yahay Talaado ilaa iyo Axad laga bilaabo 9a.m ilaa 4p.m.

TIGIDHADA

Tigidhada qiimahoodu waa \$16 da'da 1 ilaa 101. Waa u lacag la'aan carruurta da'doodu ka yar tahay 1. Lacag la'aan u ah xubnaha.

GAADHI DHIG(PARKING)

Baabuurka waxaad dhigan kartaa garaashka ku yaala Wadada Wabasha ee ku dhegan Daarta World Trade Center oo aad ka soo geli kartid Wadada West 7 Street. Horey usoo qaado tigidhka oo keen Xafiiska Madxafka si aad u hesho lacag dhimis(3 saac waa \$7.50, nus saac kastana waxaa ku kordhaya \$1)



GAADIIDKA DADWEYNAHA

Madxafku wuxuu u dhow yahay wadada 10-aad oo ah halka tareenku istaago ee laga raaco. Basas badan ayaa aagaas yimaada. Si aad u ogaatid baska aad doonaysid inaad raacdo, akhri warbixinta ku qoran jadwalka Metro Transit.

NALA SOO XIRIIR

Haddii aad su'aalo qabtid, soo wac Madxafka Tel: 651-225-6000. Booqo mcm.org si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

AWOODDA CIYAARTA

Bandhigyadeena waxay kobciyaan waxbarashada caruurta iyadoo loo marayo ciyaaro. Cayartu waxay dhistaa maskaxda iyo jirka. Marka carruurta ciyaaraan, waxay kobciyaan xirfadaha ay ugu baahan yihiin inay ugu guul gaaraan guriga, dugsiga iyo meel kasta oo kale.

XUBINNIMO

Xubinimada Reerka - \$155

- Oggolaansho bilaasha hal sanno ee laba qof oo waaweyn iyo dhammaan carruurta ka yar 18 sano ee ku nool hal guri
- 10% qiimo dhimis ah ee makhaayadda iyo dukaanka madxafka
- \$2 dhimis ah ilaa lix tikidh martida booqashadiiba
- Qiimo -dhimisyada tafaariiqleyaasha iyo meelaha soo jiidashada leh
- 50% qiima dhimis ah madxafyada carruurta badan ee ku yaal Mareykanka

Dheefaha Dheeriga ah ee Xubinnimada Reerka - \$255

Dhammaan dheefaha xubinimada Reerka, ku dar...

- 6 kaar oo baarkin bilaash ah, 4 tikidh oo oggolaanshaha gelitaanka oo lacag la'aan ah, 4 foorjaro oo kuwa jalaatada ah
- Boorsada nooca kanfaska oo lacag la'aan ah
- Oggolaanshaha gelitaanka oo bilaash ah ama qiimo jaban oo lagu galo matxafyo badan oo ku yaala Mareykanka oo dhan

Ku dar marti - \$30 midkii

- Gelitaan bilaash ah saaxiib, daryeel-bixiye, ayeeyo ama qaraabo kale booqasho kasta
- Wuxuu noqon karaa marti kala duwan booqasho kasta

XUBINNIMADA IYO TIGIDHADA MATXAFKA OO LOOGU TALAGALAY QOYSASKA U QALMA

- Qoys kasta oo gunnooyin ka qaata EBT, WIC ama barnaamijyada qadada ee bilaashka/qiimaha jaban waxay xaq u leeyihiin tikidhaha ama xubinnimada qiimaha laga dhimay iyadoo loo marayo barnaamijka *All Play*.
- Tigidhada Dhamaan Ciyaaraha - \$3 midkiiba da'ada 1 ilaa 101
- Xubinnimada Dhamaan Ciyaaraha - Xubinnimada qoyska ku iibso \$39

WARBIXINTA MATXAFKA

- Madxafku wuxuu ka kooban yahay 3 dabaq oo bandhig ah. Carruurta jirta 1 sano ilaa 10 jir aad bay uga helaan Madxafka.
- Madxafku wuxuu carruurta 3 sano jirta iyo kuwa ka yarba ugu tala galay bandhig khaas ah oo iyaga khuseeya.
- Dukaan cuntada iyo cabitaanka lagu gado ayaa Matxafka ku yaala
- Dabaq walba wuxuu leeyahay musqulo iyo qolal nuunaha lagu nuujiyo
- Waad lasoo geli kartaa Matxafka nuune xambaarka(stroller)
- Dhammaan carruurta soo booqanaysa matxafka waa inay la socdaan oo ay kormeeraan dad waaweyn oo 18 sano jir ah ama ka weyn mar kasta.
- Sanduuqyada kaydinta alaabada ayaa laga heli karaa meel u dhow sanduuqa xafiiska. Sanduuqyadu waxay u baahan yihiin afar meelood meel isticmaalka mar keliya.